





**UN-HABITAT**

Barnaamijka Degaanka Aadama  
ee Qarammada Midoobay



**9. Xildhibaanka G/degaanka oo ah Kor Jooge**

**Taxanaha  
Tababarka**



**Xildhibaanka G/degaanka oo ah  
Kor Jooge**

**Tilmaame-bare 9**  
Tababarka Hoggaanka la Doortay

Xarunta  
QM ee  
Degsiimada  
(HABITAT)

## **Xildhibaanka Golaha Degaanku**

### **Markuu yahay Korjooge**

**Tilmaame-baraha 9aad**

**Tababarka Hoggaanka la soo doorto**

**Tarjumaddii: Jaamacadda Hargeysa**

**Istanbul, 1996kii-“Shir Madaxeedkii Caasimadaha”**

Taxanaha  
Agabka  
Tababarka

**Sawirrada waxa iska leh Joel Elrod,  
Naqshadaha iyo jaan-goynta na Vicki Gillette**

X/dhibaanka  
G/Degaanka  
markuu  
yahay  
Korjooge

Tababarka  
Hoggaanka  
la soo  
doorto

ii

**HS/715/04SO**

## HORDHAC

Sida lagu muujiyey natiijooyinka qiimaynta baahiyaha tababarka ee ay qabatay Xarunta QM ee Degtiiimada Aadanaha (Habitat), baahiyaha tababarka ee khuseeya madaxda (Xildhibaannada) la soo doortay ee Dawladda Hoose, ama se siyaasiyiinta gudaha, waxa loo arkaa inay ku jiraan arrimaha caalam ahaan ugu muhiimsan, isla markaana, ugu danaynta yar dhinacyada dhismaha wax-qabadka ee horumarka Dawladda Hoose iyo maamulkeeda.

Sannadihii yaraa ee ugu danbeeyey, tiro dalal kala duwan ah, sida Nepal iyo Polland ama Uganda iyo Paraguay ayaa ku tallaabsaday markii ugu horreysay muddo tobanaan sano ah, meelaha qaarna weligood markii ugu horraysay, hawsha doorashada Xildhibaannadooda Golaha Degaanka iyo Duqaydooda magaaloooyinka. Baahiyaha tababarka ee madaxda la soo doorto ee Dawladda Hoose waxay xagga sare ugaga jiraan ajendaha dimoqraadiyadaha cagaha loo taagay/dhismay, sida Ecuador, India iyo dalka Marykanka (USA).

Si wax looga qabto baahiyahan, Xarunta QM ee Degtiiimada Aadanaha (HABITAT) waxay hore u dhigtay oo ay tijaabisay taxanayaal buugaag Tilmaame-barayaal ah oo tababarka ku lug leh si ay uga taageeraan Xildhibaannada Golaha Degaanka in ay ka wakiilo noqdaan muwaadiniinta, siyaan hoggaaminta loo baahan yahay magaalo iyo dad ahaan ba, si hawl-karnimo leh ula shaqeeyaan Dawladda Dhexe iyo maamulka, farsamo-yaqaannada iyo xirfadlayaasha sare ee shaqaalaha Dawladda Hoose iyo hay'adaha la hal-maala. Tilmaame-barayaashani waxay sharxayaan siyaasad iyo go'aan-qaadasho, is-gaadhsiin, gorgortan iyo hoggaamin, ka-qayb-gelidda, agaasinka iyo hagidda shiraraka, xilalka karti-gelineed iyo fududeyneed ee Xildhibaanka Golaha Degaanka, maamulka maaliyadeed iyo arrimaha kale ee la hal-maala.

Tilmaame-barahan, Xildhibaanka Golaha Degaanku markuu yahay Mas'uul Maaliyadeed, wuxu ka mid yahay taxanayaal 12 ah, waxaana loogu talog-alay bilow ahaan in ay adeegsadaan tababarayaasha hay'adaha tababarka waddaniga ah ee Dawladda Hoose ama se unugyada/waaxaha tababarka ee ku dhex yaal Dawladaha Hoose. Si ay ugu noqoto taageero dheeraad ah tababarayaasha adeegsanaya Tilmaame-barayaashan, Xarunta QM ee Degtiiimada Aadanuhu ( HABITAT) waxa kale oo ay soo daabacday buug kale oo kaabaya ama lammaane/wehel u ah taxanahan Tilmaame-barayaasha ah. Buuggan la yidhaa "Tusaha Tababaraha ee Tababarka Saraakiisha la soo doorto" oo ka kooban qoraallo tababaraha khuseeya iyo macluumaadba, waxa loogu talo-galay in tababaruhu uga faa'iidaysto qorshaynta aqoon-is-weydaarsiyada Saraakiisha la soo doorto ee ku salaysan Tilmaame-barayaashan.

Waxaan filayaa in Tilmaame-barayaashan si weyn wax uga tari doonaan xoojinta dhismaha awoodda wax-qabad ee Dawladaha Hoose, dhinaca unkidda dhaqammada hoggaaminta wacan, kuwaas oo ka mid ahaa ujeeddooyinkii waaweynaa ee 1996kii Shirweynihii Xarunta QM ee Degtiiimada Aadanaha, Habitat II.

**X/dhibaanka  
G/Degaanka  
markuu  
yahay  
Korjooge**

**Tababarka  
Hoggaanka  
la soo  
doorto**

Waxaan u mahad-naqayaa Dr. Fred Fisher iyo Mudane David W.Tees kaalintii ay ka qaateen diyaarinta Tilmaame-barayaashan iyo kuwo kale oo ku jira taxanayaashan, iyaga oo la kaashaday shaqaalaha Xarunta QM ee Degtiiimada Aadanaha (HAABITAT) Qaybta Tababrka ee ka tirsan isla Xaruntaa QM oo ay taageero u fidisay Dawladda Netherlands. Waxa kale oo aan rabaa in aan xuso talooyinkii iyo tilmaamihii ay ku darsadeen Tabarayaasha iyo madaxda Dawladda Hoose ee Costa Rica, El Salvador, Kenya, Lithuania, Romania iyo Uganda ee naga caawiyay tijaabintii goobeed ee Tilmaame-barayaashan.

Dr. Wally N'Dow  
Kaaliyaha Xoghayaha -Guud  
Xarunta Qaramada Midoobay ee  
Degtiiimada Aadanaha (Habitat)

**X/dhibaanka  
G/Degaanka  
markuu  
yahay  
Korjooge**

**Tababarka  
Hoggaanka  
la soo  
doorto**

## **AQOONSI:**

Tarjumadda iyo habaynta af Soomaaliga ah ee Tilmaame-barayaasha Hoggaanka la soo doortay waxay ku hirgashay Barnaamajka Is-maamulka Fiican iyo Tababarka Hoggaanka la soo doortay ee ay maal-gelisay EU-du, isla markaana uu fuliyay Xafiis Goboleedka UN-HABITAT ee Afrika iyo Dalalka Carbeed.

Tarjumadda iyo habaynta af Soomaaliga ah ee Tilmaame-barayaashan Tababarka Hoggaanka la soo doortay, waxa ka hawl-galay koox tarjumadda ku xeel dheer oo ka tirsan: Akaademiga Nabadda iyo Horumarka, Jaamicadda Hargeysa iyo Jaamicadda Cammuud; iyaga oo ay ka caawisay Hay'adda QM ee HABITAT, laanteeda Hargeysa ku taal.

Mahad-naq gaar ah waxa mudan Akaademiga Nabadda iyo Horumarka oo ka hawl-gashay tifaf-tirka iyo isu-ekeysiinta Tilmaame-barayaashan.

Waxa kale oo mahad-naq mudan Jacfar Maxamed Gaaddaweyne oo Akaademiga Nabadda iyo Horumarka ee Somaliland ka tirsan, Maxamed Muumin oo Jaamicadda Bariga Afrika ee Puntland ka tirsan iyo Maxamed Afrax oo Xarunta Cilmi-baadhisti iyo Dood-wadaagga ee Koonfurta-Dhexe ee Soomaaliya ka tirsan, kuwaas oo wada diyaariyay tarjumadda erezada Ingiriisiga ah ee Tilmaame-barayaashan ku jira.

Mahad-naq gaar ah waxa isna mudan Maciej Sudra oo diyaariyay astaamaha iyo naqshadaha jaldiyada Tilmaame-barayaashan.

**X/dhibaanka  
G/Degaanka  
markuu  
yahay  
Korjooge**

**Tababarka  
Hoggaanka  
la soo  
doorto**

## HALKA UU KAGA JIRO TILMAAME-BARAHAN

### Bogga

Sida loo isticmaalayo Tilmaame-barahan

1

### Qaybta: 1aad

#### **Qormo ku saabsan Xildhibaanka G/Degaanku markuu yahay Korjoogaha 4**

Qeexid	5
Soo-ururin.	5
Milicsi	5
Aragtiyaha iyo Fikradaha	5
Barta bilowga guud iyo Yoolalka	6
Kormeerka horumarka siyaasadeed	8
Kormeerka hirgelinta	9
Buuxinta goldaloolada inta aanay fidin	10
Kol haddii ay hirgelintii hawshu socto	12
Qodobbo muhiim ah	14
Tixraacyo	15

X/dhibaanka  
G/Degaanka  
markuu  
yahay  
Korjooge

### Qaybta: 2aad

#### **Aqoon-is-weydaarsi ku saabsan Xildhibaanka G/Degaanku markuu yahay Korjoogaha**

16

Tababarka  
Hoggaanka  
la soo  
doorto

Muuqaal Guud	17
9.1 Layli diyaar-garow: Kaalinta korjoogaha	19
9.2 Bandhigga Tababaraha	20
9.3 Layli: Liistada hubinta ee Korjoogaha Golaha	21
9.4 Layli: Sayladdii aan hirgelin	24
9.5 Layli: Qiimayn barnaamaj.	25
9.6 Layli: Gudbinta Xirfadeed	28

## SIDA LOO ISTICMAALAYO TILMAAME-BARAHAN

Tilmaame-barahan ku saabsan XILDHIBAANKA GOLAHA DEGAANKU MARKUU YAHAY KORJOOGAHA, sida Tilmaame-barayaasha kale ee taxanahan, waxa loo isticmaali karaa dhowr siyood.

### Diraasad kuu gaar ah:

Qormada bilowga u ah tilmaamahan waxa loogu talagalay in qof waliba isagu isbaro. Waxa qudha ee aad u baahan tahay waxa weeye wax aad wax ku qorto iyo meel aan buuq lahayn oo aad in waqtii ah ku fakirto. Si aad u gaadho natijjo wanaagsan, waxannu kugu boorinaynaa in aad qorto jawaabaha su'aalaha qormada la iska weydiin karo. Wax badan bay xogta waxbarasho u kordhisaa akhristaha waqtii siiya una hab-raaca sida ay tahay.

### Tababarka aqoon-is-weydaarsiga:

Qoraallada iyo layliyada tilmaamahan tababaraha waxa adeegsan kara tababarayaal waaya-aragnimo u leh tababar-howleed lagu siinayo xildhibaanno ka kala socda dawlado kala duwan oo maxalli ah. Waxannu ku darnay noocyo howl-barasho oo kala duwan iyo qaabab kuwaas oo aannu tababartayaasha dabac dheeraad ah ku siinayno si ay ku waafajiyaa tababar-howleedka baahiyaha gaar ahaaneed ee xildhibaannada ka qaybqaadanaya. Danta aanu ka lahayn dejinta tilmaamahani waxa ay ahayd in aanu kugu dhiirigelino in aad tababare ahaan ku labto waaya-aragnimadaadii oo aad sare u qaaddo wuxtarka barasho ee agabka tababar u leeyahay xildhibaannada ka qayb qaadanaya.

X/dhibaanka  
G/Degaanka  
markuu  
yahay  
Korjooge

Tababarka  
Hoggaanka  
la soo  
doorto

Waad go'aansan kartaa, tababare ahaan, in aad agabka tilmaamaha u adeegsato sida ay u kala hormaysan yihiin iyo habka loo soo bandhigay. Hase yeeshii, dib u habayn iyo wax ka beddel sida hadba loogu baahdo agabka ayaad ku samayn kartaa si aad u buuxiso ujeedooyinka xaaladda gaar ahaaneed ee tababar. Adiga ayaa u door leh in aad bixiso saddex saacadood oo tababar ah adiga oo isticmaalaya layliyada iyo howlqabadyada muhiimka ah ee tilmaamaha. Ama adiga oo ka faaiidaysanaya agabka badan ee tilmaamaha ayaad ku kaali kartaa aqoonta kuu gaarka ah si aad maalin dhan ugu sinto socodka barnaamijka.

Tilmaamahani wuxu ka mid yahay taxane 12 ah oo loogu talagalay in lagu tababaro hoggaamiye la doortay. Adiga ayaa go'aansan kara ama waa lagaa codsan karaa in aad fuliso tababar-howleed u baahan adeegsiga tilmaame mid ka badan ama dhammaan 12ka tilmaame oo ay kugu qaadato muddo dheer. Iyada oo tilmaame kasta gaar ahaantiisa loo isticmaali karo baa kala horraysiinta sida loo isticmaalaa siin kartaa xildhibaannada ka qayb qaadanya awood weyn iyo barasho ay ku dhafan tahay waaya-aragnimo.

### **Tababar kooxeedka:**

Agabkanna waa la isticmaali kara, iyada oo ay ku fiican tahay in la kaalmaysto tababare waaya-aragnimo leh si loo horumariyo xilgudashada xildhibaanno ka wada shaqeeya meel uu ka jiro xukun dawli ahi. Marka aynu tababarayno xildhibaanno wada shaqeeya, waxa khasab ah in haguhu yahay qof diyaar ah oo u habayn kara siyaalo kala duwan howlqabadka tababarka ee tilmaamaha. Hage ahaan waxa la arkaa adiga oo eegaya xaaladda ama duruufa inaad mararka qaarkood howlqabadyo cusub ku darto. Waxa aan rajeynaynaa in marka xaaladahan oo kale yimaadaan aad tilmaamahan u aragto abxad-agab aad ka helayso fikrado tababar oo kala duwan oo hadba sida xaaladdu noqoto la isugu dari karo, laysu raac-raacin karo, la isu waafajin karo ama la iska dhaafi karo.

Tilmaamayaashan wax lagu tababaro waxa aad ka helaysaa fursado aad siyaalo badan wax ugu kala doorato. Waxan ku rajo weyn nahay in aad si weyn uga faaiidaysato.

**X/dhibaanka  
G/Degaanka  
markuu  
yahay  
Korjooge**

**Tababarka  
Hoggaanka  
la soo  
doorto**

**QAYBTA 1aad**

**QORMO**

X/dhibaanka  
G/Degaanka  
markuu  
yahay  
Korjooge

Tababarka  
Hoggaanka  
la soo  
doorto

**X/dhibaanka G/Degaanka markuu yahay  
Korjooge**

**Qormo****Qeexid**

Marka kaalinta xildhibaanku tahay Korjooge ayay tahay inu hubiyo in golaha iyo shaqaaluhuba ay qabanayaan waxa saxa ah iyo in ay waxa saxa ah ku fuliyaan hawl-qabadka ay ka mid yihiin kormeeridda siyaasadda iyo qiimaynta barnaamijka iyo adeegyada.

**Soo-ururin**

Waxa aynu eegaynaa kaalinta xildhibaanka ee kormeere oo ah dejinta iyo fulinta siyaasadda iyada oo dhinacyada kartida iyo hufnaanta aynu ka soo shiish qaadanayno. Waxa aynu kale ee rabnaa in aynu ogaano sababaha ay fulinta kaalintaasi u dhib badan tahay.

**Milicsi**

Marka aan u arko naftayda kormeeraha go'aannada iyo howlqabadka ee golaha iyo dawladda maxalliga ah, waxa maskaxdayda ku soo dhacaya waxyaalaha soo socda:

1.

---



---

2.

---



---

3.

---



---

**X/dhibaanka  
G/Degaanka  
markuu  
yahay  
Korjooge**

**Tababarka  
Hoggaanka  
la soo  
doorto**

**Aragtiyaha iyo Fikradaha**

Marka aad tahay xildhibaan ee aad gudanayso kaalinta kormeere hab-dhaqanka iyo qiimaynta awoodda qofku ku fulinayo go'aannada goluhu soo saaro waxa la arkaa ama ay u badan tahay in aanay ahayn wax ku xiisageliya siiba marka aad tahay xubin la soo doortay. Waxa la arkaa in aad ka jeelaan lahayd in aad siyaasadda dejiso iyo in aad curiso barnaamijyo iyo adeegyo halka aad ka kormeerayso dabagalkooda iyo in ay u fuleen sidii loo qorsheeyey. Ma aha keliya in ay tahay qaybtaasi, kormeere ahaan, shaqo aan ku xiisagelinayn ee waxa kuu raaca dhibaatooyin badan oo kale oo weheliya kaalinta kormeere.

## **Qormo**

kuwaas oo ku kasbada waaya-aragnimadooda aqooneed (sida xisaabiye ama sarkaal shaqaale) ama ah qof raba inu gacan ku yeesho howl-maalmeedka dawladda maxalliga ah. Xilka noocaas ahi aad buu uga culus yahay in lagu dhaafu koox yar oo aqoon leh ama dad la heer ah kuwa kormeera waddooyinka. Waxa ay howshaasi u baahan tahay in xildhibaannada oo dhammi ka wada qaybgalaan.

Waa tan labaad ee xildhibaanno badan ayaa u xaglinaya in ay u arkaan waajibka kormeere fursad siinaysa in ay ku yeeshaan gacann howlmaalmeedka dawladda maxalliga ah. Haddii aanay magaala yar ahayn oo awood darro aanay ka horjoogsanayn in ay yeelato dad aqoon sare oo maamul leh, taasina aanay ku khasbayn in saraakiisha la soo doortay kormeeraan howlmaalmeedka, waxa ay ku haboon tahay in aanay faragelin sii ridan ku samayn maamulka. Faragelin tu waxa ay ku noqonaysaa duudsi ama yaraysi awoddha kooxda maamulka haysa haddii aanayba niyad jab ku noqon.

Waa tan saddexaad ee waxa la arkaa in ay noqoto wax aan suurtagelinba ama ay adkaato sida aad u noqoto kormeere macquul ah haddii aanad garawsanayn bar-bilowga laga eego ama looga cabir qaato howlgudashada.

Ugu dambayn, waa in ay kaalinta kormeere ee goluhu noqotaa geed-ka-go'an oo ay diyaar u noqdaan in ay u huraaan waqtiga iyo tamarta ay tahay in ay qaadato haddii la rabo in ay wax saamayn ah ku yeelato xilgudashada golaha ama haya'adda.

## **Barta bilowga guud iyo Yoolalka**

**X/dhibaanka  
G/Degaanka  
markuu  
yahay  
Korjooge**

**Tababarka  
Hoggaanka  
la soo  
doorto**

Kaalinta kormeeraha waxa lagu soo koobi karaa qiimaynta lagu sameeyo in dawladda maxalliga ahi u shaqaynayo si karti iyo hufnaan leh iyo in kale. Qeexiddaasi waxa ay noqon kartaa mid si u sahlan sina u murugsan. Waa sahlantay waayo waxa jira erayo aynu maqlaynay ama u soo joognay ilaa muddo intii aynu kaalin ku lahayn xaalad-shaqo oo habaysan. Way murugsantay oo wax kasta oo dawladda maxalliga ahi qabanayso aye yudub badhtanka jeexdaa. Erayada "karti" iyo "hufnaan" badi waxa loo nisbeeyaa in ay xidhiidh la leeyihii haya'adaha sida gaarka ah loo leeyahay, in kasta oo haya'adaha dawladduba mustawe la mid ah la joogaan.

Buuggiisa uu Peter Duckler kaga hadlayo khayraadka adduunku qadariyo ee dhinaca maamulka ayaa wuxu erayga "karti" ku qeexayaa inu yahay "in la qabto waxa saxa ah," erayga "hufnaan"na wuxu ku qeexayaa inu yahay "in sida saxa ah wax loo qabto". Si fudud haddii aynu u dhigno kartiyi waa xilka kowaad ee hoggaamiye la doortay halka ay hufnaani ka tahay doorka kowaad ee saraakiisha iyo shaqaalaha dawladda maxalliga ah. Laba boglaynta amuurtani waa mid sahal ah hase yeeshie dhibaatadu waxa ay ka joogtaa sidii uu kormeeruhu ku kasi lahaa sida uu u qabanayo "waxa saxa ah" iyo in kooxda maamulku ku khasban tahay in ay si sugar u qabtaan waxa laga doonayo in ay qabtaan iyo in ay islamarkaa u qabtaan "si sax ah".

6

Xildhibaannadu waxa ay u baahan yihiin si ay u garowsadaan in ay qabanayaan wixii saxa ahaa iyo in kale in ay laba dhinac ka eegaan barnaamijyada iyo adeegyada magaalada: a) Miyey jirtaa baahi gaar ahaaneed oo weli bulshadu u qabto barnaamijkan ama adeeggan? iyo b) Haddii baahidu weli jirto, ma waxa ay tahay in magaaladu qabato

**Qormo**

barnaamijka ama adeegga mise waa in cid kale samayso? Qof baa la arkaa inu yidhaahdo weydiinta qayteeda dambe waxa ay runtii soo gelaysaa sabada fakirka ah, “in sida saxa ah wax loo qabto,” hase yeeshoo waxa ay tahay inu go’amiyo goluhu in ay sax tahay qabashadeedu. Dhinaca kale waxa goluhu go’aan ku gaadhi karaa in aanay toos u qaban adeeggaas (Tusaale: ururinta qashinka) ee ay qandaraas ku siiyan hay’adaha gaar ahaaneed, iyada oo islamarkaana la waafajinyo heer-beeg ay bulshadu ku qanacdo, sidaas ay tahay weli goluhu kaalin mug leh ayuu ku yeelanaya fulinta adeegga. Miyaanay taasi jihawareer ahayn?

Bal aan eegno buugga labada qoraa Osborne iyo Gaebler “Reinventing Government” si aynu jiha wareerka u sii deexanno. Wuxa ay yidhaahdeen “hufnaan waa cabirka lagu beego inta uu ku kacayo unugga wax soo saar” halka ay “kartiyi ka tahay cabirka lagu beego tayada wax soo saarka” (sida ugu fiican ee lagu sugayo in la gaadho yoolkii la rabay). Wuxa ay u muuqataa in labada qoraa su’aal iska weydiinayaan “in la qabto waxa saxa ah,” oo sida Druckler sheegay kartida u ah xuddun. Hase yeeshoo labadii qoraa ee soo jeediye in hindise dib loogu noqonayo hab-dawladeedka ayaa qoraalkooda waxa ku jiray isticmaalka erayada “wax soo saar” iyo “natijjooyin”.

Osborne iyo Gaebler waxa ay leeyihiiin “faraq weyn baa u dhixeeeya cabirka habraaca iyo cabirka natijjadda”. Laakiin su’aashu waxa weeye: Maxaa taas ka khuseeya wax soo saarka iyo natijjadda? Sida ay iyagu qabaan wax badan ayaa ka dhixeeeya. Wuxa ay leeyihiiin ma dhaliso natijjaddu wax soo saarka. Tusaale: haddii 50 arday dugsiga farsamada ee beesha ka dhammaystaan tababar sannad ah oo lagu barayo sida loo dayactiro bamka beeraha lagu waraabiyo laakiin aanay jirin shaqo u bannaan xirfadlayaashaa, sidee barnaamijkaasi u noqon karaa mid fiican? Mase odhan karnaa wixii saxa ahaa buu qabanayaan dugsigu, haddii aynu ka duulo fikraddii Druckler? Dugsiga wax soo saarkisii aad buu u fiican yahay, hase yeeshoo, ma laha natijo waayo ardaydii ka soo baxday waxba kama dheefin xirfaddii lagu tababaray oo shaqo kuma helin. Wuxa ay noqotay arrin si fiican loo ebyey (qabtay), hase yeeshoo aan loo baahnayn in marka horeba la qabto.

**X/dhibaanka  
G/Degaanka  
markuu  
yahay  
Korjooge****Tababarka  
Hoggaanka  
la soo  
doorto**

Qeexidda Osborne iyo Gaebler meel cuyub ah bay arrinta gelisay. Xaaladdii aynu soo xusnay haddii aynu tusaale u qaadano, isuduwaaha dugsigu wuxu ku doodti karaa inu si buuxda ugu guulaystay labadii shuruudoodba. Kuwaas oo ah a) inu tababaray xirfadlayaal aqoon u leh sida dayactir loogu sameeyo bamamka beeraha lagu waraabiyo oo ku kacay kharash ka hooseeya intii loogu talagalay, b) tayada xirfadlaho oo gaadhsisan heer uu ku qaban karo howsha laga rabo taas oo ka dhalatay barnaamijka waxbarasho ee lagu tababaray. Shaki kuma jiro in ay arrintaa qorayaashu ka murmayaan ama isdifaac kala horimanayaan iyaga oo leh isuduwuuhu kuma guulaysan howsha marka laga eego dhinaca hufnaanta waayo dadkii uu tababaray kuma helin xirfaddii lagu tababaray shaqo beegta xirfadooda.

Wuxa kuu bilaabmaya hadaba in aad arki karto laba-dhaca weji ee isku dayga aad ugu jirto in aad si hufan u sugto xubnaha xilka kormeeraha. Haddii aan dib ugu yara noqonno isuduwaaha dugsiga, sidee baynu isaga wax uga saari karnaa xagga shaqo helidda? Miyaanay taasi ahayn shaqo qof kale leeyayahay? Iyada oo sidaa ah baa hadana

**Qormo**

isuduwaha iyo dadka la shaqeeyaa haddii ay si hufan u raacaan qorshe leh istraatejiyad habraac (oo si sax ah loo qorsheeyo loona hilladiyo waxa soo socda) oo weliba karti leh (waayo hillaadinta iyo qorshayntu waa wixii saxa ah ee ay qaban lahaayeen maamulayaashu) bay ahayd in ay sii ogaadaan in aanay jirin baahi loo qabaa waxa ay soo saarayaanba. Marka ay caynkaas noqoto waxa ay ahayd in ay tababarka dhinac kale u jiheeyaan si ay xirfado loo baahan yahay (sida kuwa bullaacadaha ka shaqeeya) dadka tababar ku siyyaan.

**Kormeerka horumarka siyaasadeed**

Hadba inta aad u jирто ama sida aad ugu dhowaato qabashada shaqooyinka gaarka ah aaya kaalintaada kormeerna kuugu fududaanaysaa. Nasiibdarro, ma aha xildhibaan ahaan kaalintaada kormeere in aad ku talax tagto shaqooyinka gaarka ah, in kasta oo ay iska jирто hiyi la kac in aad la booddo oo shaqaalaha wadada ka shaqaynaya wax ka sheegto sida ay howsha u qabanayaan ama in aanay si fiican u samayn karayn godadka wadada iyada oo aad tusaalo ku bixinayso kan ku yaal halka jidkaagu ku dhammaado. Wuxa loo baahan yahay in aad iska ilaalso hiyi la kaca noocaas ah marba haddii aad tahay xubin ka mid ah golaha shacbiq doortay oo aad kaalintaada kormeer ku jeediso arrimaha bulshadu sida weyn u danayso.

Ma jирто dokumant ay si sharci ah ugu qeexan tahay heer ahaan halka uu gaadhi karo ama loo baahan yahay inu gaadho awoodda kaalinta xildhibaan ahaan aad u leedahay in aad hoos ugu daadegto fulinta xilka kormeer. Balse waxa ay aad ugu lug leedahay awoodda aad u leedahay in aad qabato waxa saxa ah. Wuxa aynu kalsooni ku qabnaa in markii uu Druckler tixraaca ku sameeyey kartida aanu hadalkiisa ku soo koobin sharci ahaan kaalinta golaha. Wuxu leeyahay, “kartiyi waxa ay sal u tahay guusha – hufnaani waa xaalad gundhig u ah oo guul la gaadhay ku jiri karto ama ku sii raaqi karto”.

Inta badan xaaladaha kaa horimanayaa waxa ay ku lug leeyihii kormeerka labada qaybood ee siyaasadaha iyo barnaamijyada. Labadooda waxa aad u adag in la qiimeeyo kartida siyaasadeed waayo waxa ay si ahaan danaysaa in si sax ah xulasho loogu kala sameeyo tartanka loogu jiro baahida khayraadka gabaabsiga ah. Tusaale: ma waxa ay kartidu badanaa tahay in lacag loo qoondeeyo dhismaha dugsi hoose, shan waddo oo dusha laga salaaxo, mise in la bilaabo tababar cusub oo ku saabsan intaan ilmuu dhalan. Waxa cad in kartida ka dhalata go'aannada noocaas ahi ay keeni karto xaqiqiyo la taaban karo. Si aydaan hadaba u samayn go'aan noocaas ah baa waxa loo baahan yahay in adiga iyo asxaabtaaduba ka gudubtaan go'aan ka sal leh laaxi iyo arrin ka fog xaqiqada.

Marka ay hadaba halkaa joogto dhowr qodob baa meesha soo gelaya:

- € Ma waxa jirta baahi la taaban karo oo loo qabo barnaamijka iyo adeegga aad madaxa ku hayso?
- € Suurtagal ma tahay in aad qabato wax isbeddel dhaliya?

X/dhibaanka  
G/Degaanka  
markuu  
yahay  
Korjooge

Tababarka  
Hoggaanka  
la soo  
doorto

## **Qormo**

- ↳ Waa ayo qofka kale ee sidaa u qaban karaa ama si ka sii fiican?

Marka lagu qanco waraysiga noocaas ah, siyaasaddana la dejijo, kaalinta kormeeruhu waxa ay noqonaysaa mid ah in la hubiyo iyo in la qiimeeyo dadaalka loogu jiro fulinta:

- ↳ Ma yahay barnaamijka ama adeeggu mid dabooli kara baahidii aad madaxa ku haysay xilligii aad dejinaysay?
- ↳ Si fiican baahidii ma loo daboolay? Miyaad quudhsatay baaxadda shaqada iyo awoodda aad isbeddel ku samayn karto?
- ↳ Adiga oo ka shidaal qaadanaya kormeerkii kuu socday, ma dhici kartaa mase tahay suurtagal in cid kale samayso barnaamijka ama adeegga?

Waqtiga ugu habboon in la sameeyo qiimaynta siyaasadeed ee noocan oo kale ah waa marka loo fadhiyo falanqayn miisaaniyad. Si kasta oo anigu aanan u noqonayn doonyaqaad habka "Zero-based Budget" inu yahay habka maamul-lacageedka, hadana istraatejiyadda iyo falsafadda uu ku dhisan yahay ayaa ah mid macna weyn sameeya marka laga eego sida loo qiimeeyo siyaasadda howlgudasho.

Habka ZBB wuxu leeyahay waa in ahmiyad la siiyo in dib loo qiimeeyo barnaamij iyo adeeg walba bilowga meertada miisaaniyadda cusub. Bilowga meertada miisaaniyadda cusub waxa aad madaxa maamulka ama sarkaalka lacagta weydiisan kartaa inu diyaariyo liistada dhammaan barnaamijyada iyo adeegyada xilligaa socda. Adeeg ama barnaamij walba waa in la qiimeeyaa iyada oo la isticmaalayo liistada su'aalaha kor ku qoran, gole walibana waa inu kalsooni ku qabaa muhimadda ay leedahay in ay ka go'an tahay inu mustaqbalka u jiheeyo.

**X/dhibaanka  
G/Degaanka  
markuu  
yahay  
Korjooge**

Weydiimaha u habaysan noocani waxa ay golaha ka caawinayaan inu si fiican culays ugu hayo siyaasadaha ku aaddan hubinta iyo qiimaynta. Siyaasadda fulinta kormeerriddu waa iskuday looga dan leeyahay in bulshada sahan dheer loogu hilladiyo. Waxa ay kale ee tahay xilli aad u tafaxaydato isku habaynta wixii aad sidatey taas oo ay tahay in ay kaa caawiso urursiga kaydka aad rabto in aad jidka dheer ku waajahdo.

**Tababarka  
Hoggaanka  
la soo  
doorto**

Kaalinta golaha ka saaran kormeeka xilgudashada barnaamijyada iyo adeegyada ee aad idinku dejiseen baa ah habraac ka sii dhib badan. Sida ay la socdaan hoggiyeysaasha adduunka oo dhan laga doortay, inta badan waxa faraqa weyni ka yimaadaa waxa goluhu dejijo iyo waxa shaqaalihiisu fuliyo. Sida badi loo tilmaamo wax kale ma aha faraqa fulinta ka dhashay ee waa gaabis ka soo dhex baxay waxa goluhu rabo marka laga eego xagga xilgudashada iyo dejinta siyaasadaha iyo qorshayaasha lacagta iyo sida wax u dhacaan marka la meelmariyo siyaasadda iyo miisaaniyadda. Bal aan hadda eegno qaar ka mid ah sababaha keenay inu soo baxo faraqa fulinta oo boog ku noqday ujeeddooyinka fiican ee golaha.

**God yar baa markab weyn dejin  
kara.**

**Maahmaah Ruush ah**

- 1. Way fududahay sida aad ku dejisaa siyaasad; fulinteeduse ma aha.** Taas bay u eg tahay sababta ugu weyn ee uu faraqu u jiraa una sii fidaa ama u kordhaa. Marka laga wadahadlayo siyaasadda hadii aan fiilo iyo tixgelin la siin xaqiiqada jirta ee ah waxa ay ku qaadanay ama ku kacayso in barnaamijyada iyo adeegyada la meelmariyo, waxaan laga fursanayn in ay taasi horseeddo dhibaatooyin mar keliya soo booda .
- 2. Wixa loo baahan inu jiro istraatejiyad wax lagu fuliyo marba haddii aanay jirin siyaasad ama barnaamij kelgii guul lagu gaadhi karaa.** Barnaamij ama siyaasad kasta oo la rabo in ay si guul ah ku fusho, waxa ka horreeya baahida loo qabo istraatejiyad ay ku fusho. Wixa istraatejiyad lagu qeexi karaa tiro waxqbad ah oo loo ebyey qaab yool siyaasadeed lagu xaqijiyo. Haddii fikraddu ka dhalato xaadal sahal ah, istraatejiyaddu waxa ay ka soo dhex bixi kartaa shirarka ay qaataan agaasimayaasha fulinta iyo madaxa waaxaha ee dawladda maxalliga ah. Mararka kale waxa ay u baahan tahay shirar badan oo waqtidheer doodahoodu qaato si haya'adda loogu diyaariyo in ay xilka dheeraadka ah dhabarka u ridato.
- 3. Wixa badi gabaabsi ah qalabka siyaasadaha lagu hirgelinayo.** Sababta ugu weyn ee aan fulinta siyaasadaha loogu guulaysan ama waxa ka soo baxaa uu u yar yahay waxa weeye qalabka lagu fuliyo oo yar ama aan jirinba. Hanti la'aan ayaa badanaa dhalisa isu-dheelitir la'aanta howlgudashada u dhexaysa siyaasadda iyo fulinta. Laakiin jawaabtu ma aha in lacag badan la geliyo keliya. Carqalladda ugu weyn ee howlgudasho waxa ay ka imanaysaa baahida loo qabo shaqaale dheeraad ah iyo horumarintooda. Dawladda maxalliga ah qaar badan baa waxa ay qabaan in ay fidin karaan barnaamijyadooda iyaga oo aan kordhin aqoonta ay shaqaalahoodu qabashada howsha u leeyihiin. Haddii la rabo in si guul ah loo meelmariyo fulinta siyaasadaha cusub, waxa loo baahan yahay in badi shaqaaluhu yeesho aqoon, xirfad iyo maskax furan.
- 4. Kharashka howl-socodsiinta iyo dayactirka oo inta badan ku yar.** Kharashka loogu talagalo in muddo dheer lagu wado howl-socodsiinta iyo dayactirka barnaamijyada iyo adeegyada cusub ee magaalada ayaa inta badan ah kuwo ay dawladda maxalliga ahi iska indha-tirto, taas oo ku noqotay weji-gabax iyaga iyo haya'adaha maalgelinta sida Bangiga Adduunka. Wixa ay noqdeen dalalka soo korayaa meelaha adduunka u ah qashin qubka alaabta. Wixa aad arkaysaa alaab qiimo badan iyo gawaadhi nooc walba leh oo tuulan. Shaqaale aan aqoon u lahayn sida loo isticmaalo ayaa baabuurta burburiya. Qaar kale waa la "fadhaa/qashaa" si biraha loogala baxo waqtigaas aan beddelkooda la hayn. Mar walba dawladda maxalliga ah laguma eedayn karo dhibaatooyinkaas. Inta badan qalabka way keenaan kuwa deeqda bixiyaa laakiin dan kama galaan baahida loo qabo tababarka sida loogu shaqaynayo iyo dayactirkooda midna.
- 5. Marka dadka xilku ka saaran yahay fulinta barnaamijyada iyo adeegyada cusub si ay ku kalsan yihiin (macquul ah) looga qaybgelinwaayo habraaca qorshaynta waxa dhici karta in ay ka badh noqdaan dhibta dhalisa faraqa fulinta.** Horumarinta shaqaaluhu u yeelanayo fahamka inu go'aansado una heelanaado howlaha ay ka qaybgeleyaan waa in ay bilowga la saan-qaadaa qorshaynta iyo habraaca siyaasad-dejinta. Marnaba qaadista tallaabooyinkaasi

X/dhibaanka  
G/Degaanka  
markuu  
yahay  
Korjooge

Tababarka  
Hoggaanka  
la soo  
doorto

**X/dhibaanka  
G/Degaanka  
markuu  
yahay  
Korjooge**

**Tababarka  
Hoggaanka  
la soo  
doorto**

- deg deg ku noqonmaayaan dadka qaadaya xilka fulinta.
6. **Dadka howsha loo qabanayo ee wax ka dheefaya barnaamijyada iyo adeegyaduna runtii kuwaas bay la mid yihiin.** Adiga iyo dawladda maxalliga ahi marka aad dejinaysaan qorshaha iyo fulinta waxqabadyo cusub, ha moogaanina in aad maskaxda ku haysaan dadka macmiisha ah ee aad howsha u qabanaysaan. Wuxa caqliga wanaagsani inoo sheegayaa in ka qaybqaadashada bulshadu ay sare u qaaddo qorshaynta iyo dejinta barnaamijyada cusub. Waxase weli aan aad loo fahmin waxa weeye doorka ay xubnaha bulshadu ka qaadan karaan haddii la siiyo tababar xagga hubinta iyo qiimaynta barnaamijyada iyo adeegyada dawladda maxalliga ah.
7. **Ha moogaan baahida loo qabo horumarinta shaqaalaha iyo haya'adaha.** Si kasta oo barashada xirfad cusub ama aqoon cusubi aanay ahayn wax ahmiyad weyn u leh sida goluhu u meelmarinayo waxqabad cusub, waxa dhici karta kala duwanaanta sida shaqaaluhu u kala aragti duwan yahay in ay fulinta howsha ragaadiso ama is-hortaagto. Iyaga oo qaab-kooxeed samaynaya si ay uga guulaystaan carqaladaha noocaas ah ee is-hortaagaya howlgudashada ayey isticmaaleen in ay hab-wadareed u duulaan qaar badan oo dawladda maxalliga ahi. Taasi waa dadaal horseed u ah inu kooxda u sahlo helitaanka tub ay xubnuhu wadajir ugu shaqayn karaan, qorshe lagu howlgalana u sameeyn karaan, iyo in ay eegaan sidii ay u waajahi lahaayeen xilgudashada iyaga oo u dhug yeelanaya carqaladaha siiba nooca ka yimaadda xagga haya'adaha. Waxa carqaladaha noocaas ah ka mid ah qaab-raac aan loo baahnayn, qaybaha haya'adda ee u meelaysan si khalad ah ama aan waafaqsanayn baahida shaqada, iyo iyada oo aanu dhisnayn hab abaalmarin oo dhalin kara ku hiyigelin howlgudasho wanaagsan. Wax kasta oo sare u qaadaya horumarinta qofka iyo haya'aduhu wuxu dhalin karaa in fulintu u dhacdo si guul leh. Hantida la gashado horumarinta shaqaaluhu si weyn bay isu bixisaa iyada oo dheeftu gaadho dhinac walba, taas awgeed baan kharashka ku baxa loo qaadan karin wax lagu cayaaray ama shaqaalaha oo si aan loo baahnayn loo abaalmariyey.
8. **Si uu u noqdo qofku kormeere karti leh wuxu u baahan yahay hab-hubineed uu howlgudashada ku dabagalo.** Istraatejiyadda hab-hubineed wanaagsan baa si weyn kormeeraha uga caawin karta gudashada xilka uu u hayo golaha. Istraatejiyaddu waa in ay qiyaasi karto dhinaca tayada iyo dhinaca taranta labadaba. Waase in aad iska hubisaa kuwa ii-dheehda ugu jira xog ururinta xagga taranta. Haya'adaha iyo shaqaalaha haya'aduhu waxa ay si weyn oo xamaasad leh isaga daba ridaan noocyada qalab ee wax lagu hubiyo ee ay iyagu rabaan. Keliya waxa aad ururisaa xogta iyo wararka aad uga baahan tahay in aad ku dabagasho horumarka siyaasadaha iyo barnaamijyada la fulinayo. Waa in aad ka qaybgelisaa doodaha hubinta iyo habraaca go'aanka dadka qaadaya xilka fulinta. Marka muddo la joogaba waa in aad fiiro u yeelato habka qiimaynta iyo hubinta si aad u aragto in xogtii iyo macluumaadkii aad uga baahnayd inu barnaamij ku hirgalo aad u heshay. Iskuday in aad habraaca hubinta iyo qiimaynta ka soocdo ama ka ilaalso faragelinta siyaasadeed iyo maamulba. Waa in aad si weyn ugu feejingnaataa xog ururinta xilgudashada. Iyada oo muhiim ah in aad si hoose u eegto habraaca arrimaha fulinta, bay hadana si weyn uga sii muhiimsantay in aad ogaato in aad heshay natijjaddii laga filayey fulinta iyo in kale.

9. **Qof kasta oo kaalin muuqata ku leh fulintu wuxu u baahan yahay in uu fahmo yoolka iyo istraategiyadda howlqabadka cusub ee ay ka mid tahay doorka ay ka qaadanayaan howlqabadka cusub iyo iyaga oo ka dhiga fulinteeda geed ka go'an.** Haddii fahamka iyo go'aanka aad ku gudanayso fulintu bilowgaba kaa maqan yahay, qaado waqtiga aad rabto si aad halkaa u soo gaadho inta aanad hore u socon.

Waxa la arkaa in aad leedahay arrimahan badidooda ma jiraan wax ka khuseeya kaalinta kormeeraha iyo xilka golayaasha ee waxa ay ku lug leeyihii siyaasad-dejinta. Jawaabtu waxa ay noqonaysaa haa iyo maya labadaba. Waa haa, waayo waxa ay ahayd in ay mar hore ka fiirsadaan dood kasta oo ay kaga hadlayaan siyaasadda ay ku gelayaan samaynta waxqabad cusub; waa maya oo kormeere ahaan gocasho ayey kugu reebaysaa haddii aan arrinta wax laga qaban fulintu inta aanay bilaabmin. Sidaas ayeynu hungo halis ugu nahay waayo waxa ay noqonaysaa in aynu culays mar labaad saaro waxyaalihii aasaasiga ahaa ee loo baahnaa wejigii dejinta siyaasadda iyo barnaamijka, taasi waa haddii aynu rabno in aynu fudaydino culayska ka imanaya kormeerridda fulinta.

#### **Kol haddii ay hirgelintii hawshu socto**

Mar haddii aad raacdo inta badan tilmaamaha kor lagu soo sheegay, waa khasab in dadaalka aad ugu jirto hubinta iyo qiimayntu si joogto ah kuugu socdo. Waxa halkan ku yaalla fikrado ah si karti leh sida aad ugu qabanayso kaalinta kormeere marba haddii ay fulinta howshu bilaabanto.

X/dhibaanka  
G/Degaanka  
markuu  
yahay  
Korjooge

Tababarka  
Hoggaanka  
la soo  
doorto

12

1. **Gacan ku yeelo, hase yeeshee ha ku talax tegin.** Mushkiladda ugu waaweyn ee xildhibaannada ka haysata fulinta xilkooda kormeere waxa weeye in aanay laba uga dhaxayn: 1) in ay kormeerka si ku talax tag ah ugu lug yeeshaan, ama 2) in ay ku dhowaadaan in ay farahaba ka qaadaan oo aanay kormeerba samayn. Marka ilaa xad faragelinta kormeerkku gaadho waxa badi meel ka dhac iyo quudhsii u arka shaqaalaha leh awoodda xilka iyo fulinta shaqada. Marka ka warqabidda kormeerkku hoos u dhacana waxa ay badi shaqaaluhu u fasirtaan qadarin la'aan aan dan laga lahayn ama iyada oo la bannaystay in la iska baalmaro waajibkii golaha.
2. **Waxa loo baahan yahay marka howl la fulinayo in la garowsado in la gogol badiyo iyo in lala qabsado isbeddelka ka imanaya howsha la fulinayo.** Way adag tahay in la sii odoroso dhib kasta oo ku soo fool yeelan karta fulinta siyaasadaha iyo barnaamijyada cusub. Diyaar u noqo in aad shaqaalaha ama haya'adaha fulinta howlaha gacan ka siiso sida ay xaqaai'qa ka dhasha socodka howsha ula qabsadaan.
3. **U gogol bannay saba-dhaxaad murugga ka dhex aloosmi kara labada qaybood ee kala ah siyaasadda iyo maamulka.** In ka badan inta ay qirtaan dadka wadashaqaynayaa baa ka dhexayn karta hoggaanka la doortay iyo shaqaalaha maamulka. Iskuday in aad si nefis ah wax uga qabato jawiga ay ku laban yihii dareennada, wararka iyo falalku ee idin soo kala dhxgalay. Ku dhammee heshiis wixii ragaadinaya ama halis gelinaya awoodda ay mashaariicda

## Qormo

yo barnaamijyadu hore ugu soconayaan.

4. **Go'aami sida aad uga hortegayso inta aan kooxuhu isku dhicin.** Sidii aynu ku xusnay tilmaamihii “the Councillor as Facilitator”, marka howl cusub la bilaabo in la iska horyimaadaa waa lama horaan, waayo taas waa lagu yaqaan meel horumar ka socdo oo dad wadashaqayn lihi fikrado kala duwan is dhaafsanayaan. Iyada oo taas ku talagalku yahay baa kormeere ahaan lagaa rabaa inaad dejiso qorshe aad wax kaga qabanayso iska horimaadka, islamarkaana aad gacan ka siinayso shaqaalaha kale sidii ay u maamuli lahaayeen iska horimaadka ka dhaca goobta shaqo marka aad maqan tahay.
5. **Ha ka baqan in aad tidhaahdo: ‘waa iga dhan tahay’.** Kooxda la doorto guuldarrada ugu weyni waxa ay ka soo waajahdaa cabashada iyo dunuuunaca ay xal moomaan oo ay kaga baaqdaan in ay gaadhaan go'aan cuntama, xal waxtar ahna keena. Kaalinta kormeeruhu waxa ay siinay golaha kalsooni uu ku xaqiijiyo inu qabto wixii uu filayey inu gaadho markii uu siyaasadaha dejinayey ee miisaaniyadana ansixinayey. Xidhiidhka shaqaalaha fulinta howlaha dawladda maxalliga ah ee kormeeruhu la leeyahayna wuxu xaqiijiyaa sida wixii uu go'aamiyey loo meelmariyey iyo faraqa u dhexeeya fulinta wixii uu rabay inu qabto iyo sidii uu ku taamayey in ay u qabsoomeen oo aanay hoos uga dhicin wax ka badan in la aqbali karo.

X/dhibaanka  
G/Degaanka  
markuu  
yahay  
Korjooge

Tababarka  
Hoggaanka  
la soo  
doorto

**X/dhibaanka  
G/Degaanka  
markuu  
yahay  
Korjooge**

**Tababarka  
Hoggaanka  
la soo  
doorto**

### **Qodobbo muhiim ah**

- € Badi xildhibaannadu dejinta siyaasadaha iyo barnaamijyada ayey uga xiiso badan yihin howsha kormeerka.
- € Karti iyo hufnaan mid waliba waa xariiq ah bilow muhiim ah oo looga qiyaas qaato howlqabadka.
- € Haddii ay kuu noqoto in aad labadooda mid ka tagto, hubi in taasi noqoto hufnaan. Wuxuu jirta siyaalo badan oo ay hufnaantu si caadi ah ku iman karto. Hase yeesh, way dhib badan tahay sida aad karti ku yeelataa.
- € Natijadda ka soo baxda siyaasadda ayaa ka muhiimsan natijadda barnaamijka ka soo baxda.
- € Saddex qodob ayey tahay in ay xukumaan awoodda aad saarayso kormeerka dejinta siyaasaddaada iyo qorshaynta barnaamijka waxqabadkaaga:
  - Ma buuxisaa baahi muuqata?
  - Ma tahay suurtagal in waxa bulshadu haysato loo adeegsado fulinta?
  - Waa ayo cidda kale ee sideena u qaban kartaa ama si ka sii fiican?
- € Fulinta kormeerriddu waxa ay lug ku leedahay ama la xidhiidhaa yaraynta faraqa inta aanay iman fursad uu ku sii fidaa.
- € Adiga iyo qofkii kale ee lug ku lehba meel ka dhac bay ku tahay in la yaraysto wax kasta oo wax lagaga qaban karo (qalab, hanti iwm.) barnaamij ama howlqabad siyaasadeed.
- € Marka lacag laga hadlayo waxa kuu fiican in aad u xagliso fakirka ah in aan xildhibaanku dayactir lacag u oggolaandoonin.
- € Way fiican tahay in aad ka qaybgeliso dhammaan dadka aad isleedahay si weyn bay wax uga tarayaan fulinta qorshaynta iyo horumarinta barnaamijyada goluhu keeno.
- € Waxa ku baxaya horumarinta shaqaalaha iyo haya'dda waxa loo nisbaynayaa inu ka mid yahay waxa ku baxa howlaha dawladda maxalliga ah, waxana lagu darayaa siyaasad iyo barnaamij kasta oo goluhu dejiyo ama meelmariyo.
- € Deji hab aad wax ku hubiso kuna qiimayo oo baahidaada keliya buuxiya.
- € Inta aanay shaqaalaha iyo kuwa qandaraasku bilaabin fulinta wixii ku saabsan arrimaha muhiimka ah ee xagga siyaasadda ama barnaamijyada kale waa in aad heshaa ama kasbataa kalsoonida taageerada lagu fulinayo.
- € Ha noqon kormeere ay xamaasaddu madax marto. Kartidu waxa ay kaa lumi kartaa marka aad ugu baahida weyn tahay.

**Ayaandarradu weligeedba waxa ay ka soo gashaa albaab isaga oo furan laga tegay.**

**Maahmaah Check ah**

1. “Korjooge” waa magac kaalin taas oo abuurtay dareen weyn oo ay tahay inta aynaan halkaa hore uga gudbin in aynu ka hadallo. Meelo dunida ka mid ah kormeere waa qof ilaaliya daryeelka waddooyinka. Runtuse waxa weeye ma aha taas tan aynu hadda madaxa ku haynaa. Iyada oo ay na weheliyaan dad kale baanu u qaadanay qodobadan soo socdaa in ay yihiin xal beddelkooda loo isticmaali karo: “isuduwaha siyaasadda iyo barnaamijka”, laakiin taasi sax uma muuqan; “qofka xukuma qimaynta tayada”, markanna sawirka maskaxda ku soo dhacayaa waa qof Injineer ka ah warshed. Ugu dambayn waxa yimid “hubiye” iyo “qiimeeye”, laakiin kuwaasina waxa ay bixinayaan macna soo kooban. Kuwaa iyo siyaalo kale oo badan oo loo macnayn karo ayaa jira in loo fasiran karo kaalinta aanu madaxa ku hayno. Waxa aynu aaminsan nahay in ay lagama maarmaan tahay in xildhibaannadu u dareen yeeshaan qabashada waxa saxa ah (muujin karti, dhaqan u janjeedha siyaasad) iyo in ay u qabtaan waxaa sida saxa ah (iyaga oo hufnaan ku lug leh, muujinaya dhaqan-fulineed ka soo jeeda dhinaca shaqaalaha iyo haya’adda). Waxa aynu garowsan nahay in aynu ku adkaysanno isticmaalka “kormeere”.
2. Ducker, Peter, Management : Tasks, Responsibilities, Practices (New York, Harper and Row, 1974), P.45
3. For one definition of terms “efficiency” and “effectiveness”, see “the art of performance measurement”, appendix B, Osborne, David, and Gaebler, Ted, re-inventing government: How the Entrepreneurial Spirit is Transforming the Public Sector (Reading, MA, Addison-Wesley, 1992), pp. 351-2.

**X/dhibaanka  
G/Degaanka  
markuu  
yahay  
Korjooge**

**Tababarka  
Hoggaanka  
la soo  
doorto**

Aqoon  
Isweydaarsi

## **QAYBTA 2aad**

**Aqoon-is-weydaarsi**

X/dhibaanka  
G/Degaanka  
markuu  
yahay  
Korjooge

Tababarka  
Hoggaanka  
la soo  
doorto

**XILDHIBAANKA GOLAHA DEGAANKU MARKUU  
YAHAY KORJOOGE**

## Muuqaal guud

Qaab Qiimayn hab-raac ku dhisan ayaa loo baahanayaa haddii la rabo in saamaynta siyaasadda iyo barnaamijyada dawladda la qiimeeyo. Taasina waa xil ahmiyad weyn leh oo golaha saaran. Wuxu xilkaasi u sii fidayaa dhiirigelinta iyo kormeerridda xilgudashada haya'adaha iyo qiimaynta howlqabadka xubnaha muhiimka ah ee shaqaalaha.

Tababar-howleedkan ku talagalkiisu waxa weeye in ka qaybqaatayaasha lagu wargeliyo siyaalaha kala duwan ee uu xildhibaanku u gudan karo ama ay tahay inu u guto kaalintiisa kormeere iyo xadka ay ku kala baxayaan xilka golaha iyo shaqaaluhu. Waxa si weyn hoosta looga xariiqayaa kaalinta goluhu ku leeyahay kormeerridda siyaasadda iyo fulinta barnaamijyada. Tilmaame kale oo ka mid ah taxanaha “the council as institution-builder” ayaa looga hadlay kaalinta goluhu ku leeyahay hubinta ama kormeerridda xilgudashada shaqaalaha.

### Tusmo

Waxa hoos ku yaal sharax kooban oo ku saabsan qayb kasta oo ah waxqababarsho iyo qiyaasta waqtiga lagu qaadanayo. Xor baad u tahay in aad wax ka bedesho sida loo habeeyey ama aad wax ka saarto, ama waxa aad rabto ku darto waxa tababarka lagu baranayo.

#### 9.1 **Layli baraarujin: kaalinta Korjoogaha**

Ka qaybqaatayaasha tababar-howleedka waxa ay isla falanqaynayaan waxa looga jeedo “kormeer” marka laga eego aragtida dhinaca xildhibaanka iyo in ay wadaagaan fikradahooda. (30 daqiqo)

#### 9.2 **Bandhigga Tababaraha**

Tababaraha oo ka ambaqaadaya fikrado ka soo jeeda layliga baraarujiinta ayaa sharax kooban ka bixinaya qormo ku saabsan kormeeraha, iyo waaya-aragnimada uu kormeerridda u leeyahay. Waxa ka mid ahaa qodobada la tilmaamay sida aad u qiimaynayso kartida iyo hufnaanta barnaamijyada dawliga ah, sababta fulintu uga gaabisay halkii la rabay, iyo sida kormeere ahaan aad karti dheeraad ah u yeelanayso. (30 daqiqo)

#### 9.3 **Layli: liistada hubinta Korjoogaha Golaha**

Waxa ay ka qaybqaatayaashu dhammaystirayaan liistada hubinta ee muujinaysa inta kormeer ee ay samaynayaan madaxda tababar-howleedka golaha wakiilka uga ahi. Dood iyo is-barbar dhig ka samay waxa ka soo baxa ama natijadda.

**9.4 Diraasad Xaaladeed: Sayladda aan hirgelin**

Ka qaybqaatayaashu waxa ay akhriyayaan dhacdo ku lug leh golaha oo dayacay howshoodii ahayd in ay kormeeraan sida uu u shaqaynayo dhismayaasha muhiimka ah ee dadweynuhu, iyo in ay isla-falanqeeyaan waxa ay ahayd ama imminkaba tahay in xaaldda laga qabto. (45 – 60 daqiiqo).

**9.5 Layli: Qiimaynta Barnaamijka**

Iyaga oo isticmaalaya fikradihii ay ka dheegtaan casharkii la bixiyey iyo cutub buug-tilmaamayaal ah ayey ka qaybqaatayaasha oo kooxo yar yar u wada-shaqaynayaan jaangoynayaan qaab ay ku qiimeeyaan dhowr ka tirsan barnaamij adeegyada caanka ah. (90 daqiiqo)

**9.6 Layli: Gudbinta Xirfadeed**

Ka qaybqaatayaashu waxa ay sawir ka bixiyaan wixii ay barteen, go'aan qaadasho ay ku camalfalkeeda ku fulinayaanna way gaadhayaan kadib tababar-howleedka. (30-45 daqiiqo)

X/dhibaanka  
G/Degaanka  
markuu  
yahay  
Korjooge

Tababarka  
Hoggaanka  
la soo  
doorto

## 9.1 Layli: diyaar-garow: kaalinta Korjoogaha

**Waqtiga: 30 daqiiqo**

**Ujeeddo:**

Waxa la rabaa in ay layligan ka qaybqaatayaashu ku ogaadaan waaya-aragnimada uu leeyahay xildhibaanku marka uu fulinayo kaalinta kormeere iyo inu mid waliba si hufan kan kale fikraddiisa ugu qiyaaso.

**Hab-raac**

Su'aasha soo socota ku qor xaashi:

"Xildhibaanku waa kormeere," marka aan nidhaahno, maxay macna kuu samaynaysaa?

Ka qaybqaatayaasha ka dalbo in ay laba laba isu raacaan oo fikrad ahaan isla-falanqeeyaan sida ay su'aashani u khusayso xildhibaannka marka uu qabanayo kaalintiisa kormeere. 30 daqiiqo sii si ay su'aasha uga jawaabaan.

30 daqiiqo kadib ka qaybqaatayaasha ka dalbo in ay kuu soo gudbiyaan fikradihii ay isla-falanqeeyeen. Haddii ay suurtagal tahay jawaabaha isu raac raaci qaybo guud, sidan oo kale:

- € Qiimaynta siyaasad-fulinta
- € Qiimaynta howlgudashada iyo natijadda ka soo baxda
- € Qiimaynta hufnaanta adeegga dadweynaha
- € Dib – u – eeggidda lagu samaynayo meelmarinta miisaaniyadda
- € Dhiirigelinta iyo qiimaynta lagu samaynayo waxqabadka shaqaalaha

X/dhibaanka  
G/Degaanka  
markuu  
yahay  
Korjooge

Tababarka  
Hoggaanka  
la soo  
doorto

## 9.2 Bandhigga Tababaraha

**Waqtiga: 30 daqiiqo**

**Ujeeddo:**

Danta xog-bixinta laga leeyahay waxa weeye in ka qaybqaatayaasha lagu siiyo fikrado iyo aragtiyo ku saabsan kaalinta kormeeraha iyo aragti ku dhisan oo ay ku isticmaali karaan layliyada ku jira tababar-howleedka qof ahaan ama koox ahaan.

**Hab-raac**

Diyaari xog-bixin ku salaysan war laga soo qaataay qormadii hore ee ku saabsanayd kaalinta kormeeraha. Wax ka iftiimi sida aad kartida iyo hufnaanta barnaamijiyada dawliga ah u qiimaynayso, sababaha keenay goldhaloolooyinka fulinta iyo sidi loo kartigelin lahaa dib u eeggidda iyo qiimaynta waxqabadka haya'adaha.

Xogta lagu naqisho kaadhadhka wax lagu qoraa waxa la arkaa in ay kaa caawiso sidii aad si habaysan xogtii oo dhan ugu gudbin lahayd, adiga oo jadwalkana raacaya. Si aad u hubiso fahamka ka qaybqaatayaasha iyo feejignaantooda weydii su'aalo inta xog-bixintu socoto marka waqtii la joogaba si aad ku hesho sida ay ugu soo jeedaan xog-bixinta. Ku badhitaar xog-bixinta qalab-kaal oo muuqaal leh oo ay ku jiraan xaashi hore wax loogu sii daabacay iyo qalabka qoraalka lagu arki karo si fahamku u sii kordho.

X/dhibaanka  
G/Degaanka  
markuu  
yahay  
Korjooge

Tababarka  
Hoggaanka  
la soo  
doorto

### 9.3 Layli: Liistada hubinta ee Korjogaha Golaha

#### Waqtiga: 45 daqiiqo

#### Ujeeddo:

Danta layligan laga leeyahay waxa weeye in tababar-howleedkan lagu garto iyo in isbarbar dhig lagu sameeyo ilaa heer sida ay yihiin 16ka qaybood ee xilka kormeeruhu ama ay tahay in xildhibaannadu ugu gutaan xilka ay dawladda maxalliga ah wakiilka uga yihiin.

#### Hab-raac

Qaybi nuqullada *liistada hubinta ee kormeeraha golaha*. Ka codso in ka qaybqatayaashu raacaan sida la farayo iyo in ay qof qof u buuxiyaan liistada hubinta. Sii 10 daqiiqo oo ay howsha ku qabtaan. Marka ka qaybqaatayaashu bogaan howshaa ayaa si aad ku samayso liistada hubinta ee xubnaha ka qaybqaatayaasha oo koox ahaan xogtoodu u taxan tahay siinaysaa 15 daqiiqo. Waxad ku helaysaa xogtaas gacan taag aad weydiisato xubnaha si aad u hesho jawaabta qdob kasta oo ka mid ah 16ka qaybood ee xilka kormeere. Ka samay natijadda raad-reeb aad ku qorto liistada hubinta.

Inta aan la bilaabin isla-falanqaynta natijadda ka qaybqaatayaasha u qaybi afar isle'eg oo kooxo yar yar ah. Adiga oo eegaya jawaabaha ku cad liistada hubinta, weydiisato in ay koox waliba samayso istraatejiyad ama qorshe hilladinaya tub sare loogu qaadayo kartida ay xildhibaannadu ugu gudanayaan kaalintooda kormeer.

Sii 30 daqiiqo afarta (ama saddexda) kooxood si ay u dhammeeyaan howsha. Kadibna weydiiso in ay dib isugu soo ururaan. Weydiiso in ay koox waliba warbixin soo gudbiso islamarkaa ku dhiirigeli natijaddii ka dhalatay in la falanqeeyo.

X/dhibaanka  
G/Degaanka  
markuu  
yahay  
Korjooge

Tababarka  
Hoggaanka  
la soo  
doorto

### Liistada hubinta ee Korjoogaha Golaha

#### Awaamirta

*Si aad u bogto liiska hubinta, akhri mid kasta oo ka mid ah 16ka weedhood kuwaas oo ku lugle kaalinta kormeere ee xildhibaanka. Ku qor weedha dhinaceeda midig jawaabta aad is leedahay way ku aaddan tahay waxa aad aaminsan tahay in golahaagu qabto ama aanu qaban iyo waxa ay kula tahay khasab in golahaagu qabto ama khasab aan ahayn inu qabto ee ku saabsan xilka kormeere kaga aaddan qaybtaas. Ha joojin ilaa inta aad 16ka xil-qaybeed mid walba ku hubinayso jawaabta keliya ee ay leedahay.*

Golahaygu:

Aagga korjoogha	wuu qabtaa, waana inuu qabtaa	wuu qabtaa, waase in aanu qaban	ma qabto, waase inuu qabtaa	ma qabto, mana aha in uu qabto
1. Inuu kormeero iyo inuu qiimeeyo sida siyaasadda iyo barnaamijyadu u saameey- aan hawlaha golaha.	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
2. Inuu hubiyo kartida (tayo iyo taran) adeeg bixinta.	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
3. Inuu dejijo heer-beeg sare oo lagu hubiyo sida shaqaaluhu ugu heelan yahay.	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
4. Inuu sameeyo sarkaal xagga maamulka ah oo dabagal ku sameeya sida shaqaaluhu u maamulo cabashooyinka dadweyn	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
5. Inuu joogteeyo dib u eegidda cabashoo yinka si uu u xaqiijiyo in aanay samays min qaab wax- qabadkoodu aanay haboonayn.	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
6. Inuu si joogto ah u codsado warbixin uu ku eegayo sida ay isugu dheelitiran yihin ujeedoyinkii adeegga laga lahaa iyo waxa ka soo baxay.	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>

X/dhibaanka  
G/Degaanka  
markuu  
yahay  
Korjooge

Tababarka  
Hoggaanka  
la soo  
doorto

		<b>Golahaygu:</b>			
		wuu qabtaa, waana inuu qabtaa	wuu qabtaa, waase in uu qaban	ma qabto, waase inuu qabto	ma qabto, mana aha inuu qabto
Aagga Korjoogaha					
7. Inuu kormeero oo dhiirigeliyo horumarka haya'addu ka gaadhad xilgudashada shaqo.	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	
8. Inuu ku sameeyo dabagal iyo din u eegid horumarka laga gaadhad xaqiijinta ujeedada iyo fulingta siyaasadeed.	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	
9. Inuu su'aalo la weydiyo sida ay isu-waafaqsan yihiin ujeedooyinka golaha barnaamijka qaybinta miisaaniyadda iyo siyaasadda laga leeyahay.	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	
10. Inuu hubiyo haya'addu u hayso qalab iyo maalgelin ay hawsha ku qabato kuna joogtayso.	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	
11. Inuu dejiyo qaab mudnaan loogu kala hormeeyo fulinta siyaasadda iyo barnaamijka.	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	
12. Inuu siiyo fursad ay codbixiyayaasha iyo kooxa danleyda ahiba ku sheegaan fikradahooda.	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	
13. Inuu tilmaamo qaybaha u baahan in daraasad qiimayn ah lagu sameeyo.	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	
14. Inu tilmaamo qaybaha u baahan in daraasad qiimayn ah lagu sameeyo.	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	
15. Inu qiimayn ku sameeyo xilgudashada shaqaalahaa marka muddo la joogaba.	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	
16. Inu si talan-taalli ah waraysi u qabto si uu u ogaado waxa haya'adda ka socda	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>	

#### 9.4 : Layli: Sayladdii aan hirgelin

**Waqtiga: 45 – 60 daqiiqo**

**Ujeeddo:**

Ka-qayb-galayaasha ayaa layligan loogu talagalay si ay aqoontooda kormeere u meelmariyaan oo ay u lafaguraan una saxaan dhibaatooyinka caanka ah ee bulshada.

**Hab-raac**

Cod sare ugu akhri ka qaybqaatayaasha dhacdada xaaladeed ee hoos ku qoran.

Magaalo ka mid ah magaaloooyinka waaweyn ee Geeska Afrika ayaa saylad laga dhisay, taas oo aan marnaba u hirgelin sidii loogu talagalay (la filayey). 20 keliya ayaa in ka badan 200 oo qol laga galay (isticmaalay).

Waxa ay madaxda dawladda maxalliga ahi lacagtii ku baxaysay xagga amniga, dayactirka iyo bixinta qaantii dhismaha sayladda si joogto ah uga soo wareejin jireen ilo kale oo wax soo saar,

X/dhibaanka  
G/Degaanka  
markuu  
yahay  
Korjooge

Tababarka  
Hoggaanka  
la soo  
doorto

Ka dib ka-qayb-galayaashu marka ay maqlaan xaaladda u qaybi dhowr kooxood oo yar yar. Ka codso in ay koox waliba ka jawaab celiso su'aalaha soo socda ee ku saabsan xaaladda.

1. Marka go'aankii ay kormeerayaashii hore qaateen bilowgii dhismaha sayladda iyo siyaasaddii ay raaceen si ay u socodsiiyaan howlaha iyo dayactirka dhismaha dib u eegged lagu sameeyo, maxay ahayd in ay ka qabtaan arrinta (sayladda)?
2. Maxayse tahay in ay kormeerayaasha hadda joogaa sameeyaan si ay u gutaan kaalintooda kormeere?

Ilaa 30 daqiiqo kadib, ka qaybqaatayaasha dib kulan isugu keen adiga oo koox walba ka dalbaya warbixintoodii. Intaa waxa raaca falanqayn.

## 9.5: Layli: Qiimayn barnaamaj

### Waqtiga: 90 daqiiqo

#### Ujeeddo:

Danta layligan laga leeyahay waxa weeye inu ka qaybqaatayaasha siiyo hoggaamin iyo waaya-aragnimo ku dhisaan qorshaha lagu qiimaynayo adeegga dawladda maxalliga ah.

#### Hab-raac:

Waxa aad u sheegtaa ka qaybqaatayaasha in ay dhowr daqiiqo eegidoonaan qaybaha qorshaha lagu hubinayo hufnaanta barnaamijka adeegga dawladda maxalliga ah.

Saddex qaybood u qaybi ka qaybqaatayaasha, koox walbana sii mid ka mid ah barnaamij adeegyada soo socda:

1. Nadiifinta jidadka
2. Ururinta qashinka adag
3. Biya qaybinta

**Fiiro:** haddii ay tirada ka qaybqaatayaashu badan yihiin ku dar adeegyo kale liistada, saddex in ka badanna u qaybi (ka qaybqaatayaasha) si koox waliba uga shaqayso adeeg barnaamij oo kan kale ka duwan.

Kahor inta aanad kooxaha u kala dirin qaybaha shaqo, sii nuqullo xaashiyaha-shaqo (eeg bogga soo socda) una sheeg in ay hage u isticmaalaan si ay qorshayaashooda ugu dhammaystiraan. Sii ilaa 45 si ay qorshahooda u dejyaan.

Marka koox waliba dhammayso qorshaheeda, kulan isugu wada keen si koox waliba xog-waran uga siiso qorshaheeda kooxaha kale. Ku dhiirigeli in ay falanqayaan, waxtar iyo nuqsaan, wixii qorshe waliba uu lahaa ama leeyahay.

X/dhibaanka  
G/Degaanka  
markuu  
yahay  
Korjooge

Tababarka  
Hoggaanka  
la soo  
doorto

**XAASHIDA KORMEERKA WAX-QABADKA ADEEGYADA DAWLADDA  
HOOSE**

Adeeg \_\_\_\_\_ Koox \_\_\_\_\_

1. Sheeg cidda loo igmanayo inu fuliyo kormeerka qorshaha iyo sababta.

---

---

---

2. Sheeg ujeeddada adeegga (waxa bulshadu rabto in ay adeegga ka dheefto) iyo waxyaalaha aad jeceshay in aad qabato ee ku xidhiidha siyaasadda xil-gudashada (Tusaale: Sidee nadaafaddu tahay? Dhaqso ma loo qabtaa? Sidee ammaan u tahay? Sidee qiimuhu yahay? Kalsooni ma lagu qabi karaa?

**Ujeeddooyin:**

---

---

**Qiyaasta:**

a.

---

b.

---

c.

---

d.

---

**Aqoon  
Isweydaarsi**

**X/dhibaanka  
G/Degaanka  
markuu  
yahay  
Korjooge**

**Tababarka  
Hoggaanka  
la soo  
doorto**

3. Sheeg ama astee qaabka ama qaababka xog ururinta ee aad ku talin lahayd (Goob-jooge tababaran, Sahan beesha oo dhan laga qaado, Sahan goobta loogu tago dadka, Waraysi fool-ka-fool ah) si loo helo howlgudasho dhab ah iyada oo tallabooyinka la qaaday loo eegayo.

---

---

---

4. Muuji sida wixii ka soo baxay xog ururinta loo lafaguri lahaa, golahana warbixin looga siin lahaa.

---

---

---

5. Sheeg ama astee isku-xidhka si aan kala go' lahayn looga dhex samayn karo habraaca kormeerka iyo habraaca go'aan-qaadashada dawladda maxalliga ah ee ku taxaluqa arrimaha qoondaynta ama dib-u-qoondaynta miisaaniyadda, maamulka howlaha qorshaynta iyo gacan ku haynta iyo dib-u-eegidda/dhiirigelinta howlgudashada shaqaalaha.

---

---

---

## 9.6: Layli: Gudbinta Xirfaadeed

**Waqtiga: 30-45 daqiico**

**Ujeeddo:**

Danta laga leeyahay layligani waxa weeye in ka qaybqaatayaashu aqoonta waaya-aragnimo ee (gaar ahaan marka ay yihin saraakiil la doortay) ay ka kasbadaan tababar-howleedka ku dabaqaan howlqabakdooda xaaladda dhabta ah. Waxa bar-tilmaameed layliga u ah sare u qaadidda filashada, isku howlidda dejinta qorshe caqligal ah, iyo xilgudasho qof ahaan adiga kaa soo go'da. Howsha inteeda badan qofka ayaa qabanaya ihada oo isla-shaqayn iyo howsha oo la wadaagaana aanay meeha ka maqanayn.

**Garasho iyo qabasho faraq**  
**weyn baa u dhixeeya.**

X/dhibaanka  
G/Degaanka  
markuu  
yahay  
Korjooge

Tababarka  
Hoggaanka  
la soo  
doorto

Guud ahaan waa la isku waafaqsan yahay in ujeeddada tababarku yahay in horumar lagu sameeyo sida dadku wax u qabto iyada oo la tusayo si ka sii wanaagsan sidii ay wax u qaban jireen. Runtii guusha ka dhalata tababarka waxa lagu cabbiri karaa guud ahaan inta koritaanka aqoonta qofku gaadho iyo sida ficalkiisu isu beddelo inta tababarku u socdo iyo kadib marka uu dhammaadaba.

Rajo aad u yar bay tababarayaashu ka naawili karaan raad uu tababar-howleedku ku yeesho ka qaybqaatayaasha gaar ahaan marka muddada tababarku yahay wax ku siman saacado. Riyaqa tababartaha ee bilowga tababarku wuxu ku maax-dumi karaa waqtii yar oo ku siman inta uu kala kulmayo goobta shaqada hab-dhaqankii gaboobay ee loo qaban jiray howsha iyo canaad kaga yimaadda asxaabitii ay wada-shaqaynta lahaayeen ee aan iyagu tababarka ka qaybqaadan.

Dhinaca kale, is-beddelka iyo waxbarashada la go'aansado in la qaato dabayaaqada tababar-hawleedku wuxu ka-qayb-galyaasha ka caawin karaa in ay bartaan sidii ay isaga ilaalil lahaayeen in ay dhacdo in ay iyagu ka horyimaadaan naftooda iyo degaankooda shaqo. Tababaruuhu dadka wax baranaya wuxu gacan ka siin karaa sidii ay guul ugu gudbi lahaayeen goob waxqabad iyaga oo ka gudbaya goob waxbarasho, iyada oo ay taasna u suurtagelinayso adeegsiga tira yar oo layliyo si fudud loo qorsheeyey ah. Waxa la arkaa in waqtiga ay qaadan karto in aqoon lagu gudbin karaa noqoto inta u dhexaysa xilliga yare e aad fakrad ama wax xiisa sameeya ku baranayso ilaa inta aad ka helaysa waaya-aragnimo isbeddel dhaxalsiyya noloshaada.

**Hab-raac**

Marka aad dhammayso tababar-howleedka duruusta inta muhiimka ah ugu yaraan ku qaado nusa-saac si ka qaybqaatayaashu ugu dareen yeeshaan, islamarkaa ku dhiiri waxa ay barteen in ay si joogta ah ku camal-falkeeda ku dabaqaan howlaha golaha ka socda. Sii15 daqiiqo ka qaybqaatayaasha si iyaga oo u xor ah ay uga shaqeeyaan su'aal-weydiinta sida fudud aqoonta loogu gudbiyo.

Su'aalah marka ay bogaan ka qaybqaatayaashu, si aad u soo af jarto tababar-hawleedka, dhaqso u weydiin ay la wadaagaan kooxda laba ilaa saddex wax oo ay rabaan in ay si ka duwan sidii hore u qabtaan marka ay qabanayaan kaalintooda Korjooge.

**X/dhibaanka  
G/Degaanka  
markuu  
yahay  
Korjooge**

**Tababarka  
Hoggaanka  
la soo  
doorto**

### Weydiimo gudbin barasho ah

Dhowr daqiqo ku qaado si aad uga waranto kaalinta kormeeraha, fikradaha cusub ee aad kala kulantay tababar-howleedka, iyo sida aad guud ahaan u dareemayso. Kadib ku qor hoos tix ama laba aad ku sharxayso waxa ku xiiso geliyey ee aad qof ahaan naftaada ka baratay intii tababar-howleedku socday.

---

---

---

Adiga oo ku salaynaya wixii aad ka baratay naftaada iyo waxyaalihii tababar-hawleedka lagu soo gudbiyey ee siyaalo badan u suurtagelin kara isbeddel, waa maxay labada ama saddexda wax ee aad rabto in aad si ka duwan sidii hore u qabato marka aad fulinayso kaalinta kormeere?

- 1.\_\_\_\_\_
- 2.\_\_\_\_\_
- 3.\_\_\_\_\_

Ugu dambayn, inta aad ku jirto dadaalka aad isbeddellada ku fulinayso, maxay yihin carqaladaha aad ka filayso in ay ka yimaadaan dhinacaaga ama xagga degaankaaga shaqo?

Carqaladda	Habka aad u maareynayso
1._____	1._____
2._____	2._____
3._____	3._____

**Haddii aad baran karto, waad qaban kartaa**

**Aqoon  
Isweydaarsi**

**X/dhibaanka  
G/Degaanka  
markuu  
yahay  
Korjooge**

**Tababarka  
Hoggaanka  
la soo  
doorto**

**Aqoon  
Isweydaarsi**

**X/dhibaanka  
G/Degaanka  
markuu  
yahay  
Korjooge**

**Tababarka  
Hoggaanka  
la soo  
doorto**

## PRIORITY ONE WORDS

### ENGLISH

1. Accountability
2. Action plan
3. Active Listening
4. Alternative
5. Application
6. Assessment
7. Authority
8. Awareness
9. Basic Education
10. Beneficiary
11. Capacity Building
12. Case Study
13. Child list
14. Civic
15. Collaboration.
16. Committee
17. Communicator
18. Community

### SOMALI

- Xisaabtan**  
-Xilkaa Saaran yahay  
**-Qorshe hawleed.**  
-Wax-qabad hawleed  
**-dhegaysi feejigan**  
-Dhegaysi Darban  
-Dhegaysi Mug leh.  
**-Kala Doorasho**  
-Wax bedeli kara wax kale  
**-Arji**  
Codsi  
Adeegsi  
**-Qiyaasid**  
-Qiimayn  
**-Suldada**  
-Awood xukun  
**- Wacyi-galin**  
-Ka war qab  
**-Wax-barasho Asaasi ah.**  
**-Dan ku Qabe**  
-Ka faa'iidayste  
**-Kobcin wax Qabad**  
-Awood dhisid.  
**-Daraasad Xaaladeed**  
**-Liis Hubineed**  
**-Madani**  
-La xiriira magaalo  
-muwaadin  
**-Gacan siin**  
-Wada shaqayn  
-Is Caawimid  
**-Guddi**  
**-Gaarsiiye**  
-Isgaadhsiiye  
**-Beel**  
-Jaaliyad

19.Community Development	<b>-Horumarin Beeleed</b>
20.Concepts	<b>-Horumarin Jaaliyadeed</b>
21.Conceptual Hat Rack	<b>-Figrado</b>
	-Aragtiyo
22.Conflict	<b>-Figrada Metalaada Xilaalka</b>
23.Consensus	<b>-Is-qabad/Khilaaf</b>
	- Iska hor imaad
24.Consequently	<b>-Rayi la isku raacay</b>
	Aqbalaad figrad guud
25.Congituency	<b>-Natiijo</b>
26.Co-operation	-Cawaaqib
27.Council	<b>-Dagaan Doorasho</b>
28.Councilor	<b>-Iskaashi</b>
	Wada shaqayn
29.Counter productive	<b>Gole</b>
	<b>Xil-dhibaan Degaan</b>
	Xubin ka tirsan Gudiga degaanka
30.Criteria	<b>-Maax Dumin</b>
	-Lid ku ah.
31.Criteque	<b>-Cabirka wax lagu saleeyo</b>
32.Decion Maker	Qoddobbo wax lagu saleeyo.
33.Definition	<b>-Wax lagu Saleeyo</b>
34.Delegation/Delegate	<b>-Goa'aamiye</b>
	<b>-Qeexid.</b>
	<b>-Wefti</b>
	-Ergo
35.Democracy	<b>-Demoqraadiyad</b>
36.Description	<b>-Tilmaan</b>
	-Sifo
	-Sharax
37.Dialogue	<b>-Wada Hadal</b>
38. Effective	<b>-Wax ku ool</b>
	-Sidii la rabay wax u tarid.
39.Effective leadership	<b>-Hogaaminta wax ku oolka ah.</b>
40.Effeciency	<b>-Wax qabad fiican leh</b>
41.Elected Leadership	<b>-Hogaaminta la doortay</b>
42.Empower/Empowerment	<b>-Awood siin</b>
	-Awood u fasaxid

43.Enabler/Enable	<b>-Awood siin</b>
44.Essay	<b>-Karti siin</b>
45.Ethical	<b>-Qormo</b>
46.Evaluation/Evaluate	<b>-Maqaal</b>
47. Evaluation Survey	<b>-Hab-dhaqan</b>
48.Exercise	<b>-Qiimayn</b>
49.Facilitator	<b>-Qiimayn Sahan</b>
50.Feed back	-Baaritaan qiimayneed
51.Financier	<b>-Layli</b>
52.Gender	<b>Fududeeye/Sahle</b>
53.Goal	<b>War Celin</b>
54.Good Governanace	Jawaab Celin
55.Government	<b>-Masuul Maaliyadeed.</b>
56.Group Discussion	<b>-Jandar</b>
57.Guide	<b>-Hadaf</b>
58.Hand Book	-Gool
59.Human Resources	<b>-Hab Xukun Wanaagsan</b>
60.Human Settlement	-Hab Maamul
61.Implementation	<b>-Xukuumad</b>
62.Information	<b>-Dood kooxeed</b>
63. Institution	<b>-Tilmaamid</b>
64. Institution Builder	-Hage
65.Institutionalize	<b>-Tilmaan Bixiye</b>
66.Instruction	-Tilmaame Bare.
67.Key Point	<b>-Khayraadka Dadka</b>
	<b>-Degsiimooyinka Aadanaha</b>
	Degaamayn
	<b>-Hirgalin</b>
	-Fulin
	<b>-Xog</b>
	-Wargelin
	<b>-Haya'ad</b>
	<b>-Haya'ad Dhise</b>
	<b>-Haya'deeye</b>
	<b>-Amar</b>
	-Wax barasho
	-Wax barid
	<b>-Qoddobbo Muhiim ah.</b>
	Qoddobbo Ma Dhaafaan ah

68.Leadership Process	<b>-Geedi socod Hoggaamineed</b>
69.Learning	<b>-Barasho</b> -Wax Barasho -Tacliin Barasho
70.Learning Objective	<b>-Ujeeddooyinka Barashada</b> Yoolka Barashada
71.Local Government/Authority	<b>-Dawladda Hoose</b>
72.Majority	<b>-Aqlabiyyad</b> -Inta Badan
73.Management Process	<b>-Geedi Socodka Maaraynta</b>
74.Meeting	<b>-Kulan</b> -Shir
75.Minority	<b>-Inta Yar</b> -Laga tiro yar yahay
76. Minutes	<b>-Hadal Qor</b> -Hadal qoraal
77. Mission	<b>-Ergo</b> -Risaalo
78. Monitoring	<b>-La socod</b> -La saan qaad
79. Negotaiton/Negotiator	<b>-Wada Xaajood siiye</b> -Wada Hadal siiye -Gorgoriye
80. Networking	<b>-Shabakadeyn</b> /Nidaam hawleed oo wada shaqaynaya
81.Organization	<b>-Urur</b>
82. Over seer	<b>-Korjooge</b>
83. Over view	<b>-Dulmar/Guud Mar</b>
84. Participants	<b>-Ka-qayb-galayaasha/Kaqayb-qaatayaasha</b>
85. Perception	<b>-Faham/Dhugmo/Garasho.</b>
86. Performance	<b>-Waxqabad/Fulin Hawleed.</b>
87. Perspective	<b>-Ka eegid wajio kala duwan.</b>
88. Policy	<b>-Qorshe Hawleed/Khidad/Siyaasad</b>
89.Policy Maker	<b>-Syaasad Dejiye</b>
90. Power Broker	<b>-Awood wax ku qabte/Awood adeegsade</b>

91. presentation	<b>-Soo Bandhigid/Qadimaad</b>
92. Proactive	<b>-Ka hor dhaaf/Qorshe Curiye/Qorshe raac</b>
93.Process	<b>-Geedi socod/Socodka</b>
94.Questionnairre	<b>-Weydiimo Quran/weydiimo taxane ah/weydiimo Sahan ah</b>
95.Quoum	<b>-Tirada ugu yar ee shirku ku ansixi karo</b>
96.Rational	<b>-Maan-gal/Macquul</b>
97.Reactive	<b>-Falcelin/Qorshe laawe/Arrin ku baraarug</b>
98.Refrence	<b>-Tixraac/Raad raac</b>
99.Reflection	<b>-ilays noqod/Humaag noqod</b>
100.Resources	<b>-Khayraad.</b>
101.Revenue	<b>-Dakhli</b>
102.Role play	<b>-Door-jelid/Door ciyaarid</b>
103.Session	<b>-Fadhi/Kulan</b>
104.Shared Vision	<b>-Aragti wadaag</b>
105.Simple Majority	<b>-Aqlabiyyad hal dheeri ah.</b>
106.Simulation	<b>-Iska yeelid/U ekeysiin</b>
107.Slums	<b>-Buu caws/Carshaan/Isku raran</b>
108.Solution	<b>-Furdaamin/Xal</b>
109.Stakeholders	<b>-Daneeyayaal.</b>
110.Strategic Plan	<b>-Qorshe istaratijiyadeed.</b>
111.Strategy	<b>-Istaratijiyyad/Tab/xelad</b>
112.Summary	<b>-Soo koobid/Khulaaso</b>
113. Symptons	<b>-Astaamo/ Calaamado</b>
114. Systamatic	<b>-Habaysan/Nidaamsan</b>
115.Technique	<b>-Farsamo/Xeelad.</b>
116.Training Design.	<b>JaanjooyadaTababarka/Naqshadeynta Tababarka</b>
117.Training Material.	<b>-Agabka Tababarka/Qalabka Tababarka</b>
118.Traig Need assessment.	<b>-Qiyaasid baahida Tababarka/Qiimeynta Baahida Tababarka</b>
119.Transparency.	<b>-Wax qaris laa'aan</b>
120.Transparent	<b>-Qof aan waxba qarinaynin.</b>
121.Unanimous	<b>-Loo dhan yahay/Gedigood.</b>

122.Vision.	<b>-Aragti fog</b> /Aragti dheer
123.Warm up exercise	<b>-Iskulalayn</b> /Qandhicin/Diiran
124.Workshop.	<b>-Aqoon Isweydaarsi.</b>
<b>Priority two words.</b>	
125.Acknowledgment	<b>-Garwaaqsi</b> /Garawsi/Mahad-celin
126.Administrative Fixes.	<b>-Adeegsi</b>
127.Analysis	<b>-Gorfeyn</b> /Falanqeyn/Taxliil.
128.Assignment.	<b>-Shaqt Mucayin ah</b>
129.Assumption	<b>-Maleyn</b> /Si u qaadasho
130.Benchmark	<b>-Bar qiyaaseed</b> /Bartilmameed
131.Challenges	<b>-Caqabad</b> /Loolan/Hardan
132.Collective	<b>-Kooxeed</b> /Urureed/Wadareed
133.Conceptual frame work	<b>-Gadaan-fikradeed</b> /Aasaas fik
134.Constructive	<b>-Wax dhisid</b> /Dhismo-gal
135.Conventional Wisdom	<b>-Xikmad soo jireen ah.</b>
136.Corruption	<b>-Musuq-maasuq</b> /Laaluush.
137.Dilema	<b>-Laba daran mid dooro</b>
138.Diversity	<b>-Kala duwanaan</b> /Kala gedisnaan
139.Encouraging	<b>-Dhiiri-galin</b> /Geesinimo galin.
140.Fundamental	<b>-Asal</b> /Aasaasi.
141.Identification	<b>-Tilmaamid</b> /Baadi sooc/Aqoonsi.
142.Indivitual Contribution.	<b>-Gacan ka geysi qofnimo</b> /In qof biiri
143.Infrastructure	<b>-Dhismo-hooseed.</b>
144.Input.	<b>-Wax galin</b>
145.nsight.	<b>-Aragti Maskaxeed.</b>
146.Inspiration.	<b>-Maan-godlin</b> /Ra'yi fiican helid.
147.Interaction.	<b>-Isdhex-gal</b> /isla fal-gal/Isku dhafmid.
148.Judgement	<b>-Xukun</b> /Go'aan
149.Land Use Malaise.	<b>-Aafada dhul boobka</b> /Dhul ku habsa
150.Multipurpose	<b>-Ujeeddo badan</b> /Ujeedooyin kala du
151.Output.	<b>-Wax ka soo saarid.</b>
152.Potential Candidate	<b>-Musharax dihin</b> /Musharax iman kara
153.Pre-training.	<b>-Tababar horaad</b> /Tababar hortiis.
154.Priority	<b>-Mudnaan.</b>
155.Problem Solver	<b>Furdaamiye</b> /Xaliye dhib

156.proficiency	<b>-Xirfad Hanasho</b> /Aqoon sare u leh.
157.Public	<b>-Guud</b>
158.Public Sector.	<b>-Qaybta Guud</b>
159.Public Service	<b>-Adeeg guud.</b>
160.Regulation	<b>-Xeer Hoosaad.</b>
161.Self Governance.	<b>-Isxukumid.</b>
162.Self Introduction.	<b>-Is-sheegid/Is-tilmaamid.</b>
163.Self study.	<b>-Isbarid</b>
164.Self Assesment	<b>-Isqiyaasid/Isqiimeyn.</b>
165.Shirinking Resources.	<b>-Khayraadka sii yaranaya</b>
166.Technical	<b>-Farsamo/Farsamayn</b>
167Training needs.	<b>-Baahi tababar.</b>
<b>Priority three Words</b>	
168.Absolute Poverty	<b>-Saboolnimo</b>
169.Absolute	<b>-Gebi-ahaan/Buuxda.</b>
170.ApplicationCommitments	<b>-Nidar-gal/Daba-qaad ballan</b>
171.Bureaucracies	<b>-Biroqraadiyad/Xafiisyad Dawladda oo shaqadoodu gaabis tahay</b>
172.Caution	<b>-Taxadar/Digniin.</b>
173.Density	<b>-Cufnaan/Jirmiga shega.</b>
174.Environmental Degradation	<b>-Hoos u dhac degaan/Hoos u dhac xaaladda degaanka</b>
175.Equilibrium	<b>-Dheeli-tir/Is-le'eg</b>
176.Hawker	<b>-Ha is wareerin/Dadka badeecada naadiya</b>
177.Implication	<b>-Maldahnaan/Hadal aan dhab loo muujin laakiin laga fahmi karo wajiga qofka.</b>
178.Jurisdiction.	<b>-Haya'addaha Garsoorka.</b>
179.Legal Requirment.	<b>-Baahida Sharciyeed.</b>
180.Legislation.	<b>-Xeer Degin.</b>
181.Legitimate	<b>-Sharci ahaan/Qaanun ahaan</b>
182.Matchmaker	<b>-Isku aadiye wax isku habboon</b>
183.Misinterpretation	<b>-Fasiraad xumo/Fasiraad qaldan</b>
184.Off-spring	<b>-Farac.</b>
185.Optimistic	<b>-Samo-filasho/Samo arag/Dhanka Wanaagsan ka eeg</b>

186.Partnership	<b>-Wadaag/Wada lahaansho.</b>
187.Pessimistic	<b>-Xumo arag/Xuma filasho/Dhanka xun ka eeg</b>
188.Phenomina	<b>-Ifafaalayaal.</b>
189.Professional	<b>-Xirfadle/Xeel-dheeri</b>
190.Recycle	<b>-Sameyn celin/Dib u nacfi galin</b>
191.Rules.	<b>-Qawaaniin/Xeer</b>
192.Status Quo	<b>-Xaalad taagan</b>
193.Stimulation.	<b>-Xiiso galin/Fi-fircooni galin.</b>
194.To Wear different Hats.	<b>-Xilqaad badnaan/Kaalimokala duwan qaa</b>
195.Waterpolution.	<b>-Dikhaw Biyood/Wasakhaw Biyood/Dhiiq</b>
196.Facilitator	<b>-Fududeeye</b>
197.Financier	<b>-Masuul Maaliyadeed</b>
198.Gender	<b>-Jandar</b>
199.Negotiator	<b>-Wada hadal siiye.</b>
200.Overseer	<b>-Korjooge.</b>
201.Policy Maker	<b>-Syaasad dejiye</b>
202.Power Broker	<b>-Awood wax ku Qabte.</b>
203.Institution Builder	<b>-Haya'ad dhise</b>
204.Leader	<b>-Hogaamiye</b>
205.Leadership	<b>-Hogaamin</b>